# U GUDBINTA ISBITAAL MAXBUUS AAN WELI LA XUKUMIN (XADAYSAN AMA AAN XADAYSNEEN)

(Qaybta 48 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca qofta mas'uul ka ah xannaanadaada ("takhtarka mas'uul ka ah") | |
| 3. Magaca qaybta iyo isbitaalka | |
| 4. Taariikhda jihayntaada gudbinta | |
| 5. Miyaa la sameeyey jihayn xadaysan? | Haa/Maya |

## Waa maxay sababta aan isbitaalka la ii jiifiyey?

Waxaa laguu soo gudbiyey isbitaalkaan sababtoo ah Xoghaayaha Dawladda ee Caddaalada ayaa labo takhtar u sheegay inaad qabtid jirro maskaxeed iyo inaad u baahan tahay inaad ku jirto isbitaalka sidii laguu daaweeyo.

Xoghaayaha Dawladda ee Caddaalada wuxuu soo saarey amarka "jihaynta gudbinta" sida u qabo qaybta 48 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983 kaaso siinaayo awood ay isbitaalka u gudbiyaan maxbuus aan weli la xukumin.

Waxaa xittaa suurtogal ah in Xoghaayaha Dawladda kuu soo saarey amarka jihaynta xadaysan sida u qabo qaybta 49 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

## Waa maxay jihaynta xadaysan?

Markii lagugu sameeyo amar jihayn xadaysan, waxaa loola jeedaa in lagaa sii dayn karin isbitaalka haddii Xoghaayaha Dawladda ee Caddaalada ay sheegin in lagu sii dayn karo. Xaaladdaan, soo dayntaadana wuxuu ku xirnaan doonaa shuruudo oo laguu macanayn doono markii waqtigaas loo soo dhowaado. Intii aad ku jirtid isbitaalka, qofka mas'uul ka ah xannaanadaada (takhtarka mas'uul kaa ah) waa inuu waafiqidda ka helaa Xoghaayaha Dawladda ka hor inti aadan fasax ku meel gaar ah u bixin ama isbitaal kale laguu dirin.

## Ilaa gormee ayaa halkaan joogi doonaa?

Waxaa isbitaalka lagugu hayn doonaa ilaa uu ka dhamaado jihaynta gudbinta.

Haddii halkaan laguu soo gudbiyey **ka dib markii amar xabsi ku hayn soo sameeyo Maxkamadda Hoose:**

> waxaa isbitaalka lagugu hayn doonaa ilaa uu amarka xabsi ku haynta ka dhammaado, aysan ka ahayn haddii laguu diro Maxkamadda Boqortooyada sidii maxkamad laguu saaro *ama* haddii amar xabsi ku hayn kale kugu sameeyo Maxkamadda Hoose (markaas waxaad ku jiri doonta isbitaalka). Maxkamadda Hoose waxay xittaa amri kartaa in la joojiyo jihaynta gudbinta haddii takhtarka mas'uul kaa ah sheego inaadan u baahnayn in isbitaalka lagugu daweeyo jirrada maskaxda. Waxaad markaas ku laaban doonta xabsiga, aysan ka ahayn haddii ay maxkamadda ku go'aansato inay kugu sii daaso damiinasho.

Haddii halkaan laguu so gudbiyey **sidii maxbuus shacbi ama sharciyada hijrada:**

> waxaa isbitaalka lagugu hayn doonaa ilaa taariikhda lagaa sii dayn lahaa xabsiga ama xarunta dadka lagu haayo, aysan ka ahayn haddii takhtarka mas'uul kaa ah sheego inaadan u bahnayn daaweyn. Haddii lagugu xukumay jihayn xadaysan iyo takhtarka mas'uul kaa ah sheego inaadan u baahnayn daaweyn, waxaa laguu celin doonaa xabsiga ama xarunta dadka lagu haayo.

**Xaaladaha kale:**

> waxaa lagugu hayn doonaa isbitaalka ilaa uu takhtarkaaga mas'uul kaa ah u sheego inaadan u bahnayn daaweyn ama ilaa xaaladdaada uu go'aan ka gaaro maxkamadda. Haddii takhtarka mas'uul kaa ah sheego inaadan u baahnayn daaweyn waxaa laguu celin doonaa xabsiga, aysan ahayn haddii maxkamadda ku go'aansato inay kugu sii daayso damiinasho.

## Miyaa laygu hayn karaa isbitaalka markii ay jihaynta gudbinta dhammaado?

Waxaa surtogal ah in lagugu haayo isbitaalka sida u qabo qayb kale ee ka mid ah Xeerka Caafimaadka Maskaxda haddii aad u baahato daaweyn dheeraad ah ka dib markii uu jihayntaada gudbinta dhammaado. Haddii uu sidan dhaco, waxaa lagu siin donaa buug-yare kale oo kani ku macnaynaayo.

## Maxaa dhacaayo haddii aan u baahanahay inaan maxkamadda ku laabto?

Haddii aad amar xabsi ku hayn ku jirto iyo aadan weli maxkamad soo marin, waxaad u baahan kartaa inaad maxkamadda ku laabato. Maxkamadda waxay fiirin doontaa arrintaada waxayna samayn doontaa amar isbitaal sida u qabo qaybta 37 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda kaaso sheegaayo inaad u baahan taay inaad isbitaalka ku sii jirto, ama waxay ku siin karaan xukun kale. Maxkamadda waxay soo saari karaan oo kaliya amar isbitaal haddii labo takhaatiir ay sheegaan inaad qabtid jirro maskaxeed iyo inaa u baahan tahay in halkaas lagugu daaweeyo sida u qabo Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

## Miyaan rafcaan soo codsan karaa?

Rafcaan ma ka samayn kartid go'aanka uu Xoghaaya Dawladda ee Caddaalada ka sameeyey inuu isbitaal kuu gudbiyo ama amarka xabsi ku haynta u Maxkamadda Hoose sameeyey.

Laakin waxaa jira dad aad ka codsan kartid inay isbitaalka kaa sii daayaan.

Haddii lagu siinin amarka jihaynta xadaynta, waxaad Maareeyayaasha Isbitaalka ka codsan kartaa inay ku sii daayaan. Waxaad kani codsan kartaa waqti walba. Maareeyayaasha Isbitaalka waa guddi gaar ah ee ka shaqeeyo isbitaalka sidii ay go'aan uga gaaraan haddii loo baahan yahay in dadka lagu haayo isbitaalka. Maareeyayaasha Isbitaalka ayaa rabi karo inay kula hadlaan ka hor intii ay go'aaminin inay ku sii daayaan. Haddii aad rabtid inaad sidaan sameyso, waxaad warqad ugu qori kartaa cinwaanka hoos ku xusan:

| |
|---|
| Princess Marina Hospital<br>Upton<br>Northampton<br>NN5 6UH |

Ama waxaad ka codsan kartaa xubin ka mid ah shaqaala inuu kugu caawiyo la xiriirka Maareeyeyaasha Isbitaalka.

Haddii lagu siiyey ama lagu siinin jihaynta xadaysan waxaad Maxkamadda ka codsan kartaa inay sheegaan in isbitaalka lagugu haynin.

## Waa maxay Maxkamadda iyo maxaa dhici doono?

Maxkamadda waa guddi madaxbanaanan oo go'aamin karo in lagaa sii daayo isbitaalka. Wuxuu kullan la sameyn doonaa adiga iyo shaqaalaha isbitaalka ee ku yaqaano. Kullanka waxaa lagu magacaabaa “dhegaysi”. Waxaad qof kale ka codsan kartaa inay dhegaysiga kuu soo raacaan sidii ay kuu caawiyaan, haddii aad doonayso. Dhegaysiga ka hor, xubinada Maxkamadda ayaa akhrin doono warbixinada iyo xannaanada isbitaalka adiga kaa soo qorey. Hal ka mid ah xubinada Maxkamadda ayaa xittaa imaan doono sidii uu kuula hadlo.

## Gormee ayaan maxkamadda codsi ka samaysan karaa?

Waxaad codsi Maxkamadda ka samayn kartaa hal mar waqti walba inti lagu jiro lixda bilood ee koowaad ka dib markii lagugu sameeyey amarka jihaynta gudbinta.

Waxaad markaas codsi samayn kartaa hal mar lixda bilood ee xiga, kadibna hal mar sanad walba ee isbitaalka lagugu haayo waqtigaas ka dib.

Haddii lagugu sameynin amarka jihaynta xadaysan, qoyskaaga soke ayaa xittaa codsi ka soo samaysan karo Maxkamadda hal mar lixda bilood ee labaad ka dib markii lagugu sameeyey jihaynta gudbinta iyo hal mar sanadkiiba markaas ka dib. Buug-yarahaan wuxuu hoos kugu macnaynayaa qofka lagu magacaabey inuu ahaado qoyskaaga soke.

Haddii aad rabtid inaad codsi ka sameyso Maxkamadda waxaad u soo qori kartaa:

The Tribunals Service
PO BOX 8793
5th Floor
Leicester
LE1 8BN Tel. 0845 2232022

Waxaad qareen ka codsan kartaa inuu Maxkamadda uu warqad wakiil ahaan adiga kuu soo diro iyo inuu kugu caawiyo dhegaysiga.
Isbitaalka iyo Ururka Sharciga waxay qabaan liis ku qoran qareenada kani ku takhasuusan. Looma baahno inaad qareenka lacagtiisa bixiso. Waa bilaash markii la raaco nidaamka ku Caawinta Sharciga.

## Maxaa dhacaayo haddii ay Maxkamadda sheegto in laygu haynin isbitaalka?

Haddii Maxkamadda sheegto in lagugu haynin isbitaalka, waxaa loola jeedi karaa in lagugu celin doono xabsiga ama xarunta dadka lagu haayo, aysan ka ahayn jaddii ay Maxkamadda ku taliso inaad isbitaalka joogto.

## Waa maxay daaweynta la I siin doono?

Takhtarka mas'uul kaa ah iyo shaqaale kale ee isbitaalka ayaa kaala hadli doono daaweyn walba ee aad u baahan tahay in lagu daweeyo jirradaada maskaxeed. Xaaladaha badankood waxaa u baahnaan doontaa inaad oggolaato taladooda.

Seddax bilood ka dib, waxaa jiro shuruudo gaar ah ee ka taliyo daawoyinka laguu siin karo sidii loogu daaweeyo xaaladdaada maskaxeed. Haddii aadan rabin inaad qaadato daawooyinka, ama si xun u jirran tahay iyo aadan sheegi karin haddii aad rabtid daawada iyo inkale, takhtar oo ka socon isbitaalkaan ayaa kuu soo booqan doono. Takhtarkaan madaxbanaanan ayaa kullan la yeelan doono adiga iyo shaqaalaha isbitaalka ee ku yaqaano. Takhtarka madaxbanaanan ayaa markaas go'aan ka gaari doono daawada lagu siin karo. Markii ay jiraan xaalado deg-deg ah waxaa daawo lagu siin karaa xittaa haddii aadan oggolanin daawadaas.

Takhtarkaan madaxbanaanan waxaa lagu magacaaba SOAD (Takhtarka ku Magacaaban inuu Bixiyo Rayi'ga Labaad) waxaana jagada ku magacaabo Guddi madaxbanaan ah ee kormeero sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

Waxaa jiro shuruudo ka duwan markii la sameynaayo daaweyn gaar ah, sida ku daaweynta korontada maskaxda la marsiiyo (electro-convulsive therapy (ECT)). Haddii ay shaqaalaha u maleeyaan inaad u baahan tahay hal ka mid ah daaweyntaan gaarka ah, waxay kuu macnayn doonaan shuruudaha iyo waxaa lagu siin doonaa buug-yare kale.

## Ogeysiinta qooyskaaga soke

Haddii lagu siiyey jihayn xadaysan, nuqulka buug-yarahaan waxaa la siin doonaa qofka uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda u ku aqoonsado inuu yahay qooyskaaga soke.

Waxaa jiro liis ku qoran dad uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda ula dhaqmo inay yihiin qoyskaaga. Caadi ahaan, qofka ugu sareeya liiskaas ayaa lagu magacaabi doonaa inuu noqdo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka wuxuu ku siin karaa buug-yare si fiican kani kuu sharraxaayo iyo ku qoran xuquuqyada uu qoyskaaga soke ku leeyahay daaweyntaada iyo xannaanadaada.

Xaaladdaada markii la fiiriyo, waxaa noola sheegay in qoyskaaga soke uu yahay:

| |
|---|
| |

Haddii aadan rabin inaad hesho nuqulka buug-yarahaan, fadlan u sheeg kalkaaliyahaaga ama xubin ka mid ah shaqaalaha.

## Beddelida magaca qoyska soke

Haddii aadan u malayn in qofkaan u ku habboon yahay inuu ahaado qoyskaaga soke, waxaad codsi ka samayn kartaa Maxkamadda Degmada in qof kale lagu magaacabo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kani kuu sharraxaayo.

## Warqadahaada

Dhammaan warqadaha laguu soo diro waa lagu siin doonaa. Qof walba ayaad warqad u diri kartaa aysan ka ahayn qof diidey inaad warqad u soo dirto. Warqadaha loo diro dadkaan waxaa joojin karo shaqalaha isbitaalka.

## Shuruud Dabakhaad

Waxaa jiro Shuruud Dabakhaad oo shaqaalaha isbitaalka ku talinaayo Xeerka Caafimaadka Maskaxda iyo sida loola dhaqmo dadka qabo dhiibato maskaxeed. Waa in shaqaalaha tixgeliyaan waxa uu Shuruudda sheegaayo markii ay go’aan ka gaarayaan xannaanadaada. Waxaad weydiin kartaa inaad aragto nuqulka Shuruudda, haddii aad doonayso.

## Sida cabasho loo sameeyo?

Haddii aad rabto inaad ka cabato wax walba ee xiriir la leh xannaanadaada iyo daaweyntaada isbitaalka, fadlan la hadal xubin ka mid ah shaqaalaha.  Waxay awoodi karaan inay xaaladda xalliyaan. Waxay xittaa ku siin karaan macluumaadka habsocodka cabashada ee isbitaalka, oo aad isticmaali karto sidii aad u xalliso cabashadaada adigoo u maraayo  wax lagu magacaabo xal-helidda deegaanka.  Waxay xittaa kuu sheegi karaan qof walba ee kale ee kugu caawin karo samaynta cabashada.

Haddii aadan u malayn in hab-socodka cabashada ee isbitaalka ku caawin karo, waxaad ka caban kartaa Guddii madaxbanaan. Guddiga wuxuu kormeera sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda, sidii uu u hubiyo in si sax ah loo isticmaalo, iyo in shaqaalaha si sax ah u xannaaneeyaan bukaanlayda intii ay isbitaalka joogaan. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kuu macneynaayo sidii loola xiriiro Guddiga.

## Sidii aad u hesho caawinaad iyo macluumaad dheeraad ah

Haddii uu jiro wax aadan ka garan xannaanadaada iyo daaweyntaada, xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa isku dayi doono inuu ku caawiyo. Fadlan ka codso xubin ka mid ah shaqaalaha inuu kuu sharraxo haddii uu jiro wax aadan ka garanin buug-yarahaan ama haddii aad qabtid su'aalo oo buug-yarahaan ka jawaabin.

Fadlan weydii haddii aad qof kale u rabto  nuqul kale ee buugyarahaan.